



Guddiga PPS waxay Guadalupe Guerrero u magacaabeen in uu noqdo kormeeraha guud ee soo socda

Guddiga Dugsiga Portland ayaa si buuxda Jimcihii ugu coddeeyay in la shaqaaleysiyo Guadalupe Guerrero si uu u hoggaamiyo Dugsiyada Dadweynaha Portland oo uu noqdo kormeeraha guud ee soo socda.

Guerrero, oo hadda ah ku-xigeenka kormeeraha guud ee Dugsiyada Middoobey ee Degmada San Francisco, wuxuu naftiisa u hibeeyay xaqiijinta in dhammaan ardayda oo dhan gaar ahaan kuwa dhaqan ahaan aan si fiican adeega u helin – ay heli karaan tacliin wanaagsan oo dhalinaysa waxbarasho iyo guul laga gaaro dugsiga.

“Guadalupe Guerrero waa macallin la xaqiijiyay oo la imaanaya faham qoto dheer oo ku saabsan isku xirka wax baridda fasalka taasi oo loo baahan si ardayda looga caawiyo in ay guul gaaraan,” ayay sheegtay Julia Brim-Edwards, Guddoomiyaha Guddiga Dugsiga Portland. “Hadafkayagu waa in aan shaqaaleysiino hoggaamiye waxbarasho oo diiradda saara ardayda isla markaana leh waayo-aragnimo wax dhisid iyo nidaamyo joogto ah oo taageeraya arday kasta oo ka baxaya dugsiyadeena oo diyaar u ah kulliyad, shaqo iyo nolol. Guadalupe Guerrero waa hoggaamiyahaasi.”

“Waxaan ogaaday in aysan jirin jid gaaban oo la maro marka ay noqoto wanaajinta dugsiga degmada. Si loo wanaajiso qiyaasta natiijooyinka ardayda, waa in aad qeexdaa qorshayaal kala duwan oo isla socda si loo taageero waxbarashada isla markaana loo xaqiijiyo in xaaladahaasi taageero ay ka jiraan dugsi kasta, fasallada oo dhan, kaasi oo loogu talagalay in arday kasta horumar wanaagsan gaaro.” ayuu sheegay Guerrero. “Waxaan ku faraxsanahay in aan ka dhinac shaqeeyo qof kasta oo ka tirsan Portland taasi oo ku saabsan dadaalo ardaydu xudunta u tahay isla markaana diirada lagu saarayo sinnaanta si Dugsiyada Dadweynaha Portland looga dhigo kuwo hoggaanka u haya nidaamka dugsiga ee dalka. Ardaydeena iyo bulshadeena wax intaasi ka yar uma qalmaan.”

Shaqaaleynta Guddiga waxay ku xiran tahay kaliya marka uu dhameystiro, dib u eegid uu ku sameeyo isla markaana gobolku oggolaado in la sameeyo baaritaanka taariikh dambiyeedka u dambeeya kaasi oo laga yaabo in kaliya la bilaabo marka dalabka la sameeyo.

Guerrero waxaa la filayaa in uu shaqada kormeeraha guud bilaabo toddobaadyada soo socda, isla marka la helo ruqsadiisa Oregon.

Guerrero wuxuu xirfadiisa shaqo bilaabay isaga oo ahaa macallin dugsi hoose oo ku hadla laba luqadood, oo toddobada sano ka soo shaqeeyay Dugsiyada Dadweynaha San Francisco iyo

Boston, ka hor intaanu heli shahaadadiisa ah in uu noqdo maamule dugsi. Mar kasta waxaa soo jiidan jiray oo uu danayn jiray dugsiyada, iyo ardayda, ay la soo dersaan caqabo waaweyni: laga soo bilaabo wax baridiisii Degmada Mission ee San Francisco, ilaa laga soo gaaray bilowgiisii dugsiiga hoose ee dhibaataadu haysatay kaasi oo uu booskiisii u horeeyay ee maamule ka soo noqday Boston, ilaa uu soo gaaray ku guuleysiga lacagta deeqda ah ee federaalka isla markaana dugsiiga u horseeday dadaalo wax lagu wanaajinayo oo loogu talagalay Degmada Mission ka dib markii uu ku soo laabtay San Francisco.

Guerrero waxaa calaamad u noqotay sida adag ee u shaqeeyo, u dhageysto macallimiinta, ardayda iyo qoysaska, iyo taageerada uu siiyo fasalka. 2012-kii, wuxuu Ku-xigeenka Kormeeraha Guud ee Waxbarashada, Wax curinta iyo Cadaaladda Bulshada ka soo noqday SFUSD, taasi oo isaga u oggolaatay in qorshayaasha ka socday Boston iyo San Francisco uu gaarsiiyo ilaa heer intii hore ka badan. Intii oo joogay San Francisco – sida inta badan degmooyinka ku yaala magaalada– wuxuu sii waday dadaalka ah in uu yareeyo farqiga guulaha joogtada ah ee u dhexeeya ardayda midabyada kale duwan leh, dugsiiga degmadu wuxuu leeyahay boqolkiiba 86.5 % oo ah heerarka qalin-jabinta koox ahaaneed, kaasi oo kor u kacay 9.3 dhibcood lixdii sano ee la soo dhaafay.

Guerrero wuxuu shahaadadiisa jaamacadeed ee BA ee Taariikhda ka qaatay UCLA sanadkii 1992-kii, isaga oo labo shahaadooyinka Master-ka ka qaatay Harvard University, mida hore oo ah Hoggaaminta Dugsiiga iyo Shahaadada Maamulka, iyo ta labaad oo ah Siyaasadda Waxbarashada iyo Maamulka.

Xaaska Guadalupe ee Carolyn, oo ka soo jeeda Boston, waxay macallinka dugsiiga hoose soo ahayd in ka badan 20 sanadood iyada oo hadda macallinka fasalka labaad ka ah dugsiyada dadweynaha San Francisco. Waxay leeyihiin labo carruurta, wiil hadda bilaabaya kulliyadda, iyo gabar, bilaabi doonta sanadkeedii labaad ee dugsiiga sare.

Guddiga Dugsiiga PPS waxay si rasmi ah nidaamkii raadinta kormeeraha guud u soo noolaysay Luulyo iyada oo dhistay shaqo hore oo bulshadu qabatay Guddiga ka hor. Dhowr boqol oo ka tirsan xubnaha bulshada ayaa ka qayb qaatay nidaamka, iyaga oo mudnaantooda la xiriirta hoggaanka cusub kula wadaagay kulamadii badnaa ee dadweyne ee dhacay gu'gan, kaasi oo ay ka mid ahaayeen kulamo gaar ah oo lala yeeshay dadka dhaqan ahaan aan si fiican adeega u helin ee bulshadeena ka tirsan. Boqolaal dad ah oo dheeraada ayaa fikradahooga ku dhiibtay ra'yi ururintii internet-ka.

Guddiga cusub waxay talooyinka ballaaran ee bulshadu soo jeedisay u isticmaaleen kordhinta iyo dib ugu kuur galida sharaxaada booska, iyada oo ka dibna raadinta xirfada leh iyo ururka shaqaalaysiinta kala shaqeeyay sidii si firfircoon loola xiriira lahaa musharixiinta la filayo. Guddiga iyo la taliyayaasha wax raadintu waxay bilowgii tixgelinta siiyeen 40 qof oo la filayo iyo musharixiin iyada oo ay ku salaysnayd talo soo jeedin laga helay Guddiga, bulshada, iyo la taliyaha wax raadinta. Koox xubno ah oo ka tirsan Guddiga ayaa sameeyay baaritaan dheer ama wicitaano hordhac ah iyo kulamo lala yeelano qaar badan oo ka mid ah dadkaasi. Shan iyo labaatam musharax ayaa soo codsaday booskan, iyada oo ay guddigo xulatay toddoba ka mid ah si ay u wareysi uga qaado.

Afartii qof ee wareysiga iskugu soo hartay ee u soo gudubtay nidaamku waxay mareen wareysiyo ballaaran, oo ay ka mid yihiin wareysiyo qarsoodi ah oo ay la yeesheen bulshada iyo shaqaalaha wax daneeya ee PPS, iyo si taxadar leh oo loo eegay tixraacada iyo baaritaanka taariikh dambiyeedka.